


Barnaamijka Cuntada ee Daryeelka caruurta iyo Dadka Waaweyn

Barnaamijka Daryeelka Carruurta iyo Dadka Waaweyn (CACFP) waa barnaamij federaali ah oo bixiya soo celinta kharashka cuntada nafaqeysan iyo cuntada fudud/isnaaga ee la siiyo carruurta iyo dadka waaweyn ee xaqa u leh kuwaas ee ka diiwaangashan daryeelka xarumaha daryeelka carruurta, guryaha daryeelka carruurta iyo xarumaha daryeelka dadka waaweyn ee ka qaybqaata. CACFP waxa kale oo ay bixisaa u soo celinta kharashka cuntada la siiyo carruurta iyo dhallinyarada ka qayb qaadanaya barnaamijyada daryeelka iskuulka kadib ah iyo carruurta degan hoyga xaaladaha degdega ah.

CACFP waxay caawisaa hay'adaha inay cunto dheeli tiran, nafaqo leh siiyaan dadka ka qaybgalaya ee ay daryeelaan. Bixinta cuntooyin nafaqo leh iyo cunto fudud ayaa waxay gacan ka geysataa wanaajinta iyo ilaalinta xaaladda caafimaad iyo nafaqo ee dadka ka qaybgala waxayna ka caawin kartaa inay yeeshaan oo ay joogteeyaan caadooyinka cunto ee wanaagsan. Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA) ayaa maalgelisa barnaamijkan. Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE), Barnaamijka Adeega Nafaqada ayaa maamula barnaamijka.



Waa kuwee hay'adaha ka qayb qaadan kara?

Xarumaha Daryeelka Carruurta

- Iskuulada, xarumaha daryeelka carruurta ee dadweynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay, xarumaha daryeelka saacadaha xilliga iskuulka ka baxsan, barnaamijyada Head Start, iyo machadyada kale ee shatiga u haysta ama loo ogoaaday inay bixiyaan adeegyada daryeelka caruurta oo aan degaan ahayn.
- Xarumaha daryeelka ee faa'iido doonka ah ee u adeega ugu yaraan 25% dadka ka qaybgalaya ee dakhligoodu hooseeyo.

Xarumaha Daryeelka Dadka Waaweyn

- Xarumaha daryeel maalmeedka dadka waaweyn ee dadweynaha/dowliga ah ama kuwa gaarka loo leeyahay ee shatiyeysan ee bixiya adeegyada daryeel maalmeed habaysan, ballaaran oo la siiyo dadka waaweyn ee degaanka ayna u ahayn ee da'doodu tahay 60 iyo wixii ka weyn ama naafonimada wax qabsiga leh.
- Xarumaha daryeelka ee faa'iido doonka ah ee dadka waaweyn ee shatiyeysan oo u adeega ugu yaraan 25% ka qaybgalayaasha dakhligoodu hooseeyo.

Guryaha Daryeelka Maalintii ee Qoyska

- Barnaamijka daryeelka caruurta ee shati leh, ee aan degaanka ahayn ee lagu howlgeliyo guri gaar loo leeyahay.

Xarumaha daryeelka ee Iskuulka Kadib ee Khatarta Ku Jira

- Xarumaha ku yaalla agagaarka aagga iskuul ay ugu yaraan 50% carruurta iskuulku ay xaq u leeyihiin cunto bilaash ah ama qiimaha laga dhimay.
- Iskuulada, xarumaha daryeelka carruurta ee dadweynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay, barnaamijyada daryeelka iskuulka kadib ah ee aan sharci ahaan shatiga u haysan iyo xarumaha daryeelka carruurta ee shatiyeysan ee faa'iido doonka ah ee howlgeliya CACFP ee u adeega ugu yaraan 25% ka qaybgalayaasha dakhligoodu hooseeyo;
- Barnaamijyada daryeelka iskuulka kadib waxay bixiyaan adeegyo daryeel carruureed habaysan oo leh waxqabadyo waxbarasho ama kobcin oo ku habboon da'da carruurta oo loogu talagalay caruurta iskuulka kadib, ama maalmaha dhammaadka asbuuca ah, feestada, ama fasaxyada iskuulka inta lagu jiro sannad dugsiyeedka oo lagu sameeyo meel habaysan oo la kormeero.

Hoyga Xaaladaha degdega ah

- Hoyga xaaladaha degdega ah ee dadweynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada degaanka ee carruurta ay haysato hoy la'aanta.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan u qalmiitaanka goobta ayaa ku yaalla dhinaca dambe.

Barnaamijka Cuntada ee Daryeelka caruurta iyo Dadka Waaweyn



Sidey u shaqaysaa?

Waxaa jira saddex siyaabood oo ay xarumuhu uga qaybqaataan CACFP, sida:

1. Xarun Madaxbanaan;
2. Iyada oo goobtu ay hoos timaado goob kafaala-qaada; ama,
3. Ururka kafaala qaadaya.

Hay'adaha kafaala qaadaya iyo xarumaha Madaxa Banaan ayaa waxaa guud ahaan loo tixgelinayaa in ay yihiin kafaala qaadayaal si toos ah heshiiska ula galaya MDE. Hay'ada kafaala qaadaya ayaa bixinaysa kormeer maamul, maaliyadeed iyo hawleed oo ay ugu qabanayaan CACFP goobo badan ama hal ama in ka badan oo sharci ahaan kala gooni ah. Guryaha Daryeelka Maalinta ee Qoysku waxay ka qayb qaadan karaan oo keliya iyaga oo hoos yimaada Urur Kafaala qaadaya.

Waa maxay shuruudaha cuntada iyo cuntada fudud (isnaaga)?

Dhammaan cuntooyinka iyo cuntooyinka fudud waa inay buuxiyaan shuruudaha qaabka cuntada ee USDA ee qiyaasta cuntada iyo cabbirka ee da'da kasta oo loo adeego. Ka eeg qaababka cuntada <https://education.mn.gov/MDE/dse/FNS/prog/CACFPen/ops/meal/>.

- Xarumaha Daryeelka Carruurta: Carruurta da'doodu tahay 12 iyo kayar, carruurta muhaajirka ah ee da'doodu tahay 15 iyo kuwa kayar iyo dadka naafada ah ee da' kasta, ilaa laba cunto iyo hal cunto fudud ama laba cunto fudud iyo hal cunto maalin kasta.
- Daryeelka Iskuulka Kadib ee Khatarta ku Jira: Carruurta da'doodu tahay 18 iyo kuwa kayar ee ka qayb qaadanaya barnaamijka daryeelka iskuulka kadib, ilaa hal cunto iyo hal cunto fudud maalin kasta.
- Xarumaha Daryeelka Dadka Waaweyn: Dadka waaweyn ee ka diiwaangashan daryeel-maalmeedka dadka waaweyn ee ay da'doodu ka weyn tahay 60 sano ama leh naafonimada ilaa laba cunto iyo hal cunto fudud ah ama laba cunto fudud ah iyo hal cunto maalin kasta.
- Hoyga xaaladaha degdeg ah: Carruurta da'doodu tahay 18 iyo kayar, ilaa saddex cunto maalin.

Sidee kharash u celintu u shaqaysaa?

Kafaala qaaduhu waxay helayaan lacag celin bil kasta iyadoo lagu salaynayo tirada cuntada iyo cuntooyinka fudud ee xaqa u leh ee la bixiyey. USDA waxay dejisaa qiimaha kharash celinta sanadkiiba mar. Qiimaha kharash celinta CACFP waxa laga heli karaa

<https://education.mn.gov/MDE/dse/FNS/prog/CACFPen/Claim/>.

Sidee hay'aduhu u codsadaan?

Xarumaha daryeelka Caruurta, xarumaha daryeelka dadka waaweyn, hawladeenada barnaamijka daryeelka iskuulka kadib ah, iyo hoyga xaaladaha degdega ah ayaa waxay codsan karaan inay ka qaybqaataan CACFP iyada oo loo marayo hay'ad kafaala qaadaya ama waxay si toos ah uga codsan karaan MDE. Soo booqo websaydkeena wixii macluumaad dheeraad ah.

CACFP: <https://education.mn.gov/MDE/dse/FNS/prog/>

Cuntooyinka Iskuulka Kadib ee Khatarta ku Jira: <https://education.mn.gov/MDE/dse/FNS/prog/After/>

Email: mde.fns@state.mn.us | **Soo Wac:** 651-582-8526 ama khadka bilaashka a ee 800-366-8922